

**Doorashooyinka Guud ee Noofambar 2020 waxay siin doonaa codbixiyayaasha Degmada King fursada ay ku taageerayaan Xarunta Caafimaadka Harborview iyadoo ansixinaya talaabada maalgashiga horumarinta hantiyeed ee maalgashiyada hantida muhiimka ah.**

Hadii la ansixiyo, maalgashiga 20 sano wuxuu siin doonaa horumarin caafimaad iyo badqab Harborview, oo ay ku jiraan kordhinta awooda caafimaad ee muhiimka ah, cusbooneysiinta iyo fidinta nidaamyada casriga ah ee xakameynta caabuqa, iyo fidinta awooda baahiyaha hab-dhaqanka caafimaadka.

Maalgashigani wuxuu ka dhigi doonaa daryeelka dhimirka jira iyo waxbarashada hab-dhaqanka caafimaadka, tababarada, iyo adeegyada xarun cusub oo la kordhiyey halkasoo adeegyo caafimaad oo isku mida deegaan caafimaad ayaa la isku dari doonaa. Maalgashiyadani kaliya uma adeegi doonaan bulshooyinka jilicdasan, lakiin sidoo kale waxay caawin doonaa dhamaan shakhsiyaadka hela daawada ka hor mushkilada—iyadoo badelaysa noloshooda halka ay kaydinayso khayraadka.

Shaybaadhada bukaan socodka caafimaadka hab-dhaqanka Harborview bilaa qolal ayey noqdeen oo baahida loo qabo in la kordhiyo adeegyada caafimaadka hab-dhaqanka waxa laga dareemi karaa meel kasta.

Talooyinka ka kooban maalgashigu waxay dabo socdaan nidaam labo sano oo maalgashadayaal ah loona diyaariyey in lagu fahmo laguna aqoonsado baahiyaha hantiyeed ee Harborview iyo dhamaan bulshada Degmada King, oo ay ku jiraan talooyinka khubarada caafimaad, shaqaalaha, khubarada caafimaadka hab-dhaqanka, kireynta iyo bulshooyinka bilaa hoyga ah, iyo kuw kale. Maalgashigani wuxuu badeli doonaa cashuurta hada wuxuu kharash gareyn doonaa \$61 sanadleh dheeriya qoyska Degmada King laguna qiimeeyey \$600,000. Guji halkan si aad u aragtid isbadelka sanadlaha ah ee heerka cashuurta.

**Waxyaabaha ugu Muhiimsan Talaabada Waxa Ka Mida:**

- Dhismaha fuuq cusub oo caafimaad iyo cusbooneysiinta goobta hada oo kordhinaysa awooda cisbitaalka inuu u adeego bukaano badan markay dhacdo xaalad degdega, musiibo, ama xanuun baahsan iyo in lagu saxo nidaamyada xakameynta caabuqa iyo asturnaanta;
- Kordhinta waaxda xaalada degdega ah;
- Dhismaha dhisme adeegyada caafimaadka hab-dhaqanka oo cusub si loo buuxiyo dalabyada kordhaya ee caafimaadka hab-dhaqanka; iyo,
- Horumarinta muhiimka ah ee dhismaha taariikhiga ah ee Harborview si loo hubiyo badqabka bukaanka, shaqaalaha, iyo booqdayashaa.